HOGAAMIYE WANAAGSAN

HOGAAMIYE wanaagsanbaa
Horamar lagu gaaraa
Hagaagsanaanbaa Heer iyo
Himilo lagu tiigsadaa



W/Q: ABDULKADIR ALI ABDI

Hogaamiye wanaagsan

Ciwaanada buuga

1. Hordhac
2. Waa maxay Hogaamiye wanaagsan?
3. Latalaliye
4. Muhiimadahada hogaamiyaha iyo howlaha maamulka
5. Caqabadaha maamul xumida
6. Faaiidooyinka hogaamiyaha wanaagsan

Hordhac

Waxaa mahad iskaleh ilaah subxaanahu watacaalaa iwaafajiyay qorista buug aan uga hadlayo HOGAAMIYE WANAAGSAN maadaama bulsho kasta ay ubaahantahay hogaamiye isku duwa noloshooda iyo hormarkooda.

Dadka bani'aadamka ah waxa uu ilaahey kumaneystay caqli ay uga duwanyihiin nimcooleyda (xoolaha iyo xayawaanada kale) sidaas darteed waxaa muhiim ah inay helaan hogaamiye kala hagi kara oo midka qaldan toosiya kan saxana dhiiri galiya.

Ujeedada aan buugan uqorayo waxaa kamid ah in ay ka faa'iideystaan dadka aqrisan doona waloow aan rumeysanahay inay kujiraan dadka aqrisan doona kuwo badan oo iga aqoon badan igana aragti dheer hadana maskaxda

dabeecadeheeda waxaa kamid ah markii ay wax aqriso inay qiiro ukordheyso.

Waxaan ka codsanayaa aqristeyaasha buugaan inay ii cudur daaraan hadey ku arkaan qoraalkeyga qaladaad waxaa suurtagal ah qaladku noqon karo madbacad daabacaysa buuga ama aniga oo qorista buuga u adeegsaday aalada computerka si kasta oo ay ahaatoba ilaahay kaliya ayaa dhameystiran oo maqaldame ah ee fadlan ii cudur daara.

Ugu danbeyn waxaan guda galeynaa qeybaha buuga waxaana kaga faaloon doonaa HOGAAMIYE WANAAGSAN iyo sidoo kale taarikhaha qaar kamid ah hogaamiyeyaashii wanaagsanaa ee dunida soo maray iyo waliba talaabooyin uu qaadi karo hogaamiye kasta si uu unoqdo hogaamiye wanaagsan bulshada uu maamulayana uu kasbado.

WAA MAXAY HOGAAMIYE WANAAGSAN?

Hogaamiyaha wanaagsan waxa uu leeyahay tilmaamo aad ubadan kuwaasoo ku wanaagsan

hadba deegaanka uumaamulayo iyo dadka uu hogaanka uyahay.

Tilmaamaha aan ka xusi karno waxaa kamid ah: inuu bulshada kawar qabo dhan kastaba, inuu kormeer joogto ah ku haayo xafiisyada iyo goobaha bulshada loogu adeego, inuu k fogaado ku daneysiga hantida guud, in uu kadheeraado waji garad, qabyaalad, kooxeysi iyo eex nooc kasta ay ahaato, inuu si gooni ah uga taxadaro ilaha dhaqaalaha dalka uu kasoo galo iyo sida loo maamulayo, inuu gacan bir kumaamulaa waxa sharcigu awood usiiyo asagoo shacabkiisa uturaya asaguna uusan kuxad gudbin qaanuunka guud si dad weynaha iyo bulshada qeybeheeda kale ayaguna aysan ugu xad gudbin qaanuunka iyo sharciga.

LATALIYE

Waxaa kamid ah waxyaabaha muhiimka u ah hogaamiyaha in leeyahay latilyeyaal uu lashiro xiliga uu doonayo inuu go’aan gaaro iyo waqtiyada la jaangooynayo qodobo masiirka iyo danta guud queeya.

Hogaamiye kasta oo doonaya inuu lataliye sameysto waxaa qasab ku ah in lataliyayaashiisa uu kala saaro hadba mowduuca ay kala talinayaan tusaale ahaan: lataliyaha amniga waa inuu udhiibaa qabiir amni, lataliyaha dhanka diinta waa inu udhiibaa xeeldheere diinta islaamka aad uyaqaan, IWM.

Lataliye in lasameysto waxaa kuxiga in lala tashado balse hadii hogaamiyuhu noqdo mid aan cidna latashan waa xaqiiq inuu fashilmayo waxaana uu weynayaa tilmaanta ah HOGAAMIYE WANAAGSAN waxa uuna noqonayaa kaligii taliye aan fahamsaneyn awoodaha caqli ee ilaahey kumaneystay dadka uu madaxda uyahay.

Erayga la yiraahdo KALIGIIS TALIYE dad badan ayaa si qaldan ufahmay oo kutilmaama hogaamiyaha ay ayagu necbeystaan balse arintu sidaas wey ka duwantahay oo waxa uu leeyahay micnooyin badan oo dadka qaarkood ay dafirsanyihiin.

Eraygan (KALIGIIS TALIYE) waxaa lagu magacaa sida caadigaa hogaamiyaha go'aanka adag kaasoo aan qofna wax war ah kadhegeysan oo kaligiis wax go'aansada kadibna dhaqan galintooda bulshada kuqasba, balse hogaamiyaha noocaas ah waa hogaamiye aan qibrad leheyn oo aan garan micnaha hogaaminta iyo kafaa'iideysiga xikmadaha bulshada kazoo burqanaya.

Kaligiis taliyaha rasmiga ah waa hogaamiye aan leheyn lataliye oo taladu asaga kasoo bilaabato asagana ay kudhamaato.

(Kaligiis taliye) markii si kale loo fiiriyo waa eray dhan qaldan loo adeegsado balse qeyb ahaan saxan.

Aan ufiirino labo dhinac:

1. Dhanka ilaahey xagiisa markii layiraahdo: ilaahey kaligiis ayuu taliyaa cidna wax lama maamusho asaga kaliya ayaana koonka (aduunyada) dhan utaliya.
2. Dhanka aadamiga: hogaamiyaha waa in uu kaligiis taliyaa oo xukunka looga

danbeeyaa maxaaa yeelay waxaa loo doortay in uu leeyahay xirfad, aqoon iyo karti umadda uu ku hogaamiyo balse lataliyeyaashiisu waxa ay talo kubiiriyaan maamulkiisa balse malahan ayagu awood ay wax ugu taliyaan sidaas ayuu kaligiis taliye marmarka qaarkood sax kunoqdaa.

MUHIIMADAHADA HOGAAMIYAHA IYO HOWLAHA MAAMULKA

Hogaamiyaha wanaagsan waxaa muhiim u ah in si joogta u aqriyo waxyaabaha ay daabacaan warbaahinta caalamiga kuwaasi oo kahadlaya bulshada uu hogaanka uyahay taasi waxay sahleysaa in uu qanciyo bulshadiisa caqabad kastana uu meesha uga saaro hadii warbaahinada aduunku tabiyaan.

Waxaa kale oo muhiim u ah in uu booqashooyinka aan faaidada lahayn joojiyaa iyo ku cayaarida waqtigiisa qaaliga ah iyo hantida shacabka oo ah shey aduun iyo aakhiro ciqaab leh hadii lagu ciyaaro.

Waxaa jiro shaqaale hoosaad hogaamiyuhu u adeegsado kawar qabka arimaha maamulka xafiis kasta magaranayo in hogaamiyeyaasha dunida hada dhaqankaas adeegsadaan xiligaan balse waxaa muhiim in shaqaalahaasi kuwo aan qaadan laaluush oo shaqada loo idmaday ay uqabtaan si sharciga waafaqsan dar ilaaheyna ay ahaadaan si aduun iyo aakhiro ay ugu badbaadaan.

Waxaa lama huraan ah in hogaamiyuhu haqab tiro dadka ushaqeeya maamulkiisa si aysan udhicin dhibaateyn iyo tacadi loo geysto shacabka uu maamulayo hogaamiyaha tusaale ahaan hadii hogaamiyuhu uusan bixin mushaaraadka shaqaaalihiisa waxaa dhacaysa in shaqaalahaasi isku dayaan in ay shacabka ay u adeegayaan kaqaataan laaluush iyo dhaqaale ayagu noloshooda kumaareeystaan.

Qofka shaqaalaha ah oo lahaqab tiro waxay kaalin weyn kaqaadataa horay usocodka adeegyada umadda iyo isku aamin qab buuxa oo dhex marta qeybaha kala duwan ee maamulka

maadaama aan marmarsiiyo loo heleyn gaajo darteed in wax loo musuq maasuqo.

CAQABADAHA MAAMUL XUMIDA

Waxaa jiro dhibaatooyin iyo caqabado ka imaan kara maamul xumada hogaamiyaha taasi oo soo wajeheysa bulshada uu hogaamiyaha u yahay dalka uu kataliyo iyo waliba umadaha kale ee dariska la ah wadankaas.

Markaan hoos u fiirino caqabadaha soo wajahaya bulshada waxaa kamid ah:

1.Maciishada oo dhibaato ku imaato

2.nabad galyada oo lunta

3.kala danbeynta oo meesha kabaxda

4.xafiisyadii danta guud oo isu badalo dan gaar ah

5.kala sareyn kusaleysan qabyaalad iyo kooxeysi

6.xiriirka umadaha kale kala dhexeya dalka oo luma

7.qasaare ku imaada guud ahaan ganacsiyada mid yar iyo mid weyn

8.daryeelka dulmanaha oo lawaayo

9.gaajo iyo macluul dilaacda

10.ugu danbeyn burbur kuyimaada hogaamiyaha xukunkiisa

Caqabadaha dhanka maciishada

Waxaa tusaale loosoo qaadan karaa hadii maamulka hogaamiyuhu mid xun yahay waxaa lawaayaa shaqooyinkii ay astaahileen dhalinyarada wax baratay taasoo keeneysa in maciishada qoyska ay adkaato mararka qaarkoodna dhalinyaradu maciin bidaan isticmaalka balwada iyo maandooriyaha si ay waqti lumis uga dhigtaan.

Dhibaatooyinka xaga nabad galyada

Diinta islaamku waxa ay dajisay sharci umadu ku kala danbeyso sidaas darteed hogaamiyaha haduusan dadka uu maamulayo ku dhaqin nidaam wanaagsan waxaa dhacaysa in xataa

askarigu shacabkiisa dhibaato ugeysto ayadoo aan talaabo laga qaadina uu magaalada si xarago ah kumaro taasi waxay keeneysaa nabad galyada oo faraha kabaxda maadaama qof shaqaale u ah hogaanka dalka uu shacabka dhibaateynayo hadana uusan kacabsaneyn in loo ciqaabo oo maxkamad lasoo istaajiyo.

Kala daneynta oo meesha kabaxda

Waxaa keena hogaamiyaha xun maxaa yeelay hadii asagu uusan si sharci ah wax kumaamulin waxaa soo baxaya kuwo asaga lashaqeeya oo ayaguna rabitaankooda wax kumaamulaya taasi waxay keeneysaa in labada dhinac isqilaafaan ugu danbeyna gacan kahadal dhexmaro taasoo udaran shacabka masaakiinta ah ee loo taliyo.

Xafiisyada danta guud oo isu badala dan gaar ah

Taasi oo kale waxaa la arkaa marka hogaamiyuhu halmaamo oo uu katalaabsado u adeegista iyo ucadaalad falista shacabkiisa iyo dalka uu maamulo uuna bilaabo inuu si gaar ah hantida umada ugu naas nuujiyo dad isga xigtaal

u ah meeshana uu kasaaro isla xisaabtanka iyo sarreynta sharciga.

Kala sarreyn kusaleysan qabyaalad iyo kooxeysi

arintaan waxay soo if baxdaa marka hogaamiyuhu mid udaneeya dan qabiil ama koox asaga isku siyaasad yihiin niyadana uu kasaaro shcabku inay xaq leeyihiin.

Arintaasi waxay dhiiri galisaa dad wax magarato oo kafaa'iideysta ceebahaas oo kale ayagoo bulshada kudhex buun buuniya in qabiilkooda ama kooxdooda ay hogaanka haystaan wixii ayaga kasoo harana ay yihiin dad liita oo aan xuquuq leheyn waxaana meehsaas kadhalanaya in dad weynuhu kalsooni xumo umuujiyaan hogaamiyaha noocaas ah.

Xiriirka umadaha kale kala dhexeya dalka oo luma

Hadii hogaamiyuhu noqdo mid qaata tilmaamaha xumaanta waxaa ka hor imaada bulshadiisa sidoo kale waxa uu lakulmaa waji gabax kasoo wajaha umadaha kale ee dalkiisu xariirada ganacsi mid bulsho iyo mid dhaqan lalahaay maxaa yeelay hogaamiye dadkiisa xumeeyay dad kale wanaag inuu usameeyo lama rajeeyo.

Qasaare ku imaada guud ahaan ganacsiyada mid yar iyo mid weyn

Qasaaruhu dhinacyo badan ayuu ahaan karaa waxaana kamid noqon kara in xataa ganacsigii dalka lasoo galinayay hogaamiyuhu u adeegsado daneyso gaar ah asagoo dad xigtaal ama qaraabo la ah si gooni ah ugu saxiixa keenista quutul daruuriga dalka markaasna qiimihii wax kastaa joogi jireen ayaguna kor uqaadaan maadaama ay kalsooni kahaystaan hogaamiyaha dalka.

Daryeelka dulmanaha oo lawaayo

Hogaamiyaha xun dhibaatooyinkiisa waxaa kamid ah in aan lahelin garsoor iyo cadaalad loogu gargaaro dulmaneyaasha xaqoodu kamaqanyahay taas badalkeeda waxaa bata dadkii garsoorka haayay inay noqdaan kuwii wax ogaa cadaalad darrada.

gaajo iyo macluul dilaacda

Mar hadii aan lahelin cadaalad waxaa badanaya in shaqsi kasta oo iska bixin kara laaluushka uu ku tagri falo masaakiinta aan waxba haysan asagoo aduun yar raadinaya aysana kujirin naxariis uu umuujinayo dhibaneyaasha gaajeysan.

Abaaraha xiliyada qaar dhacayo waxaa kudhinta shacabkiisa masuuliyadna iskama saaro taasi waxay sii badinaysaa tirada dadka gaajada udhimanaya xoolohooda abaartu leefatay taasina waa qeyb kamid ah dhiibaatooyinka waaweyn ee lagu qabo maamul xumada.

ugu danbeyn burbur kuyimaada hogaamiyaha xukunkiisa

Sida lugu arkay taariikhda aduunka hogaamiyeyaasha wanaagsan lama kulmaan burbur uga yimaada shacabkooda balse taas cagsigeeda hogaamiyaha xun waxaa kahor yimaada shacabkiisa ugu danbeyna talada ayay si qasab ah uga tuuraan asaga ku danbeeya cirib xumo iyo sharaf darro uu kasbaday intuu xukunka kufadhiyay.

FAAIIDOOYINKA HOGAAMIYAHA WANAAGSAN

Faa'iidooyinka uu leeyahay waxay isugu jiraan labo qeybood oo kala ah:

1.faa'iidooyinka ay helayaan shacabka

2.faa'iidooyinka uu helayo hogaamiyaha

Faa’iidooyinka ay helayaan shacabka

Faa’iidooyinkaas waxaa kamid ah cadaalad iyo garsoor in lahelo qofna uusan kudhiiran inuu danbi kagalo umadda maadaama uu marayo ciqaab haduu dhibaato sameeyo.

Sidoo kale waxaa kamid ah faa’iidooyinka shacabku helaayaan nolol heerkeedu wanaagsanyahay kuna saleysan heerka noloshooda si kan dhaqaalaha yar haysto xataa uu uhelo nolol asaga kufilan.

waalidiintu waxay helayaan sidoo kale waxbarasho dhankasta ah oo caruurtoodu u u aadaan ayadoo aan lacag laga qaadin si bilaash ahna ilmohooda wax ugu bartaan.

Faa’iidooyinka hogaamiyaha wanaagsan ay shacabku kahelaan aad ayay ubadanyihiin buugaan kuma soo koobi kari balse waxaan kusoo gaabninayaa in shacabku dhan kasta u dareemayaan madax banaani ayagoo diintooda iyo dalkooda aysan dhib uga cabsaneyn.

Faa’iidooyinka uu helayo hogaamiyha

Hogaamiyaha wanaagsani faa’iidooyinka uu helayo ee aan kahadleyno maahan faa’iido dhaqaale balse wuxuu helayaa wax dhaqaale ka fiican oo ah sharaf inuu aduunyada kujoogo asagoo dadkiisa iyo ajaanibkuba xushmeeynayaan.

Aakhiro markuu tagona waxa uu gaarayaa darajooyin aad usareeya hadii uu ahaa qof muslim ah oo diinta islaamka kudhaqma.

Si kataba ha ahaatee hogaamiyaha wanaagsan waxa uu noqdaa tusaale ay soo qaataan dadka ku nool dunida oo dhan waxa uuna dadkiis usoo jiidaa magac iyo inuu kasoo dhex baxay hogaamiye lamahdiyay.

Waano iyo talo

Aqristaha sharta lehoow waxaa laga yaabaa inaa tahay hogaamiye nuucuu rabo ha ahaade ayna jiraan dad aad utahay hogaan oo adiga kaaga danbeeya maamulka ama aad noqo doontid hogaamiye xataa laga yaabo hogaanka dalka ugu

sareeya inaad qabatid, waxaan kaacodsanayaa hadaad aqrisid buugeygaan inaad iisoo duceysid adiguna si daacad ah aad bulshadaada ugu adeegtid adigoo ilaahey kacabsanaya

Gun iyo gunaanad

Ugu danbeyn waxaan kusoo gaban gabeynayaa buugaan inaan idin ku dhiiri galiyo daacadnimo iyo samafal aad usameyneysaan dadka masaakiinta iyo dadka dulman.

Waxaan idinka digayaa nafteydana uga digayaa kuxad gudubka xuquuq qof kale uu leeyahay iyo in si aan sharciga waafaqsaneyn bulshada loola dhaqmo.

Waxaan idinka codsanayaa inaad taageero ufidisaan caruurta agoonta ah iyo kuwa darbi jiifka ah ee waalidkooda uusan maareyn Karin noloshooda .

Hadii aad tahay qof xil ama jago ka haayo dowlad ama maamul kale waxaan kaacodsanayaa si islaamnimo leh inaad ula dhaqantid dadka kaa sugaya inaad u adeegtid.

Sidaan horay idinkugu soo sheegay hadii aad qaladaad ku aragtaan buugan iicudur daara waxaan ahay bani'aadam wax iloobi kara.

Gaban gabada buuga waxaan uga mahad celinayaa Rabbi subxaanahu wataacaalaa oo ii suurta galiyay dhamaadka buugan aan ugu magac daray HOGAAMIYE WANAAGSAN.

Mahadsanidin

Qoraaga

Magaceygu waa Abdulkadir Ali Abdi waxaan ku dhashay magaalada muqdisho ee caasimadda dalka Soomaaliya taariikhdu markey ahayd 26/November/1994.

Waxaan dugsiga sare uga soo qalin jabiyay iskuulka Al-ma'muun al-azhar al-shariif sanadkii 2012 xaruntiisa magaalada muqdisho.

Waxaan heerka koowaad ee jaamacadda uga qalin jabiyay JAAMACADDA CAALAMIGA AH EE HORSEED INTERNATIONAL UNIVERSITY oo aan kadiyaariyay Bsc. In Public Health.

Waxaan shahaadooyin kadiyaariyay qeybaha caafimaadka iyo English-ka waxa aan leeyahay hammi iyo rajo fog oo xaga hormarkeyga iyo hrmarinta dadkeyga

dalkeyga iyo diinteyda macaanka badan ee islaamka.

Waxaa jeclahay xirfado badan balse waxaan ahay qof aad ugu dadaala xirfadda qoraaynimada ah.

E.mail: suldaan.mudane@gmail.com